

Sibtamber 01, 2023

## Maalinta Alberta: Hoggaamiye Smith

Hoggaamiyaha Danielle Smith waxa uu soo saaray warbixinta soo socda oo uu ugu dabbaaldegayo Maalinta Alberta:

“Waxyaabo badan oo ay tahay inaanu ku faraxno ayaynu ku haysanaa Alberta. Alberta waxa ay hoy u tahay malaayiin dad ah oo kasoo jeeda meelo kala duwan qof kastaana waxa uu qayb ka yahay isku-dhafka hodanka ah ee inaga dhiga kuwo xooggan.

“Waxa aanu ahayn xubin hanweyn, oo wax kusoo kordhisa Federaalka laga soo bilaabo Sibtamber 1, 1905. Muddo sanado ah, waxa aanu dunida ku hoggaaminaynay soo saaritaanka tamar aan deegaanka waxyeelaynaynin oo nadiif ah. Asalkeenu waa mid xooggan – laga soo bilaabo bulshooyinka ah kuwa Dhulka Loogu Yimid iyo Metis kuwaasoo goobtan ugu yeedhi jirey gurigooda muddo qarniyo ah illaa beeraleyda iyo xoolo dhaqatada kobciyey shaqada beeraha iyo xoolaha oo ka dhigay mid dunida laga yaqaano. Waxa aanu hoy u nahay farshaxanyahanno iyo halabuureyaal, waxana aanu bartilmaameed u nahay qoysas, socdaaleyaal iyo maalgashato ka kala socota daafaha dunida.

“Maalinta Alberta waxa ay fursad inoo siisaa inaynu u dabbaaldegno cidda aynu nahay, dib u eegno halka aynu ka nimid oo aynu farxad ka muujino waxa aynu hirgelinay.

“Maanta waxa ay ku saabsan tahay ka sheekaynta gobolkeena, sanadba sanadkii ka dambeeyey, iyo qadarinta dhaxalkeena dhaqan ee hodanka ah. Waa fursad la isugu imanayo laguna hanweynaano taariikhaheena gaar-gaarka ah laguna faanayo hibada iyo wax soo kordhinta dadkeena reer Alberta.

“Inaga oo wadajir ah, waxa aynu sharfi karnaa una dabbaaldegi karnaa gobolkan cajiibka ah anaga oo soo xaadirayna munaasabadda, ku wadaagayna khibradaheena baraha bulshada inaga oo adeegsanayna #AlbertaDay ama inaga oo wakhti ku qaadanayna mid kamid ah madxafyada iyo goobaha dhaxalka ah si aynu si qoto dheer uga qaybqaadano sheekooyinka ku saabsan cidda aynu nahay iyo halka aynu ka nimid.

“Maalintan oo kale 118 sano kahor, Alberta waxa ay noqotay gobol. Waxa aan rajanaynayaa in qofkasta oo reer Alberta ah uu helo wakhti uu ku raaxaysto xafladaha kuna dabbaaldego Maalinta Alberta!”

### Macluumaadka la xiriira

- [Maalinta Alberta](#)